

NAXUUM

Cadhadii Rabbiga U Cadhooday Nineweh

¹ Kanu waa warka culus oo Nineweh ku saabsan. Oo waa kitaabkii waxa Naxuum kii reer Elkosh la tusay.

² Rabbigu waa Ilaal masayr* ah oo waa aarsadaa, Rabbigu waa aarsadaa oo waa cadho miidhan. Rabbigu cadaawayaaashiisa waa ka aargutaa, oo cadowgiisana cadho buu u kaydiyaa. ³ Rabbigu cadho wuu u gaabiya, waana xoog badan yahay, oo kii gardaran sinaba eedlaawe ugu haysan maayo. Rabbigu wuxuu jid ku leeyahay dabaysha cirwareenta ah iyo duufaanka, oo daruuruhuna waa boodhkii cagijiisa. ⁴ Isagu wuxuu canaantaa badda, oo weliba iyaduu engejiyaa, oo webiyaasha oo dhanna wuu wada qallajiyaa. Baashaan iyo Karmel way engegaan, oo ubixii Lubnaanna waa dhaday. ⁵ Buuruhu way ka gariiraan isaga, oo kuruhuna way dhalaalaan, oo dhulka xataa dunida iyo waxa deggan oo dhammuba way ku rogmadaan hortiisa.

⁶ Bal yaa dhirifkiisa is-hor taagi kara? Oo bal yaa u adkaysan kara kulaylka cadhadiisa? Cadhadiisu waa u daadatay sidii dab oo kale, oo dhagaxyada waaweynna isagaa kala dildillaacshay. ⁷ Rabbigu waa wanaagsan yahay, oo wakhtigii dhib jirona waa qalcad, wuuna

* **1:2** 1.2 Ilaal aan aqbalanayn in ilaal kale lala caabudo

garanayaa kuwa isaga isku halleeya. ⁸ Laakiinse meesheeda wuxuu ku baabbi'in doonaa daad soo buuxdhaafay, oo cadaawayaaashiisana wuu u eryan doonaa gudcurka dhexdiisa. ⁹ War maxaad Rabbiga la damacsan tiihin? Isagu wuu wada baabbi'in doonaa. Dhibaatana mar labaad soo ma kici doonto. ¹⁰ Waayo, in kastoo ay la mid yihiin qodxan isku wada murugsan, oo ay yihiin sidii kuwo cabniinkoodii ku sakhraamay, had-dana waxaa loo wada baabbi'in doonaa sidii bal engegay. ¹¹ Waxaa kaa soo baxay mid Rabbiga wax shar ah u fikira, oo xumaato ku taliya.

¹² Rabbigu wuxuu leeyahay, In kastoo ay xoog badan yihiin oo weliba ay tiro badan yihiin, had-dana iyaga waa la wada gooyn doonaa, oo isna wuu dhammaan doonaa. In kastoo aan idin dhibay, mar dambe idin dhibi maayo. ¹³ Oo haatan harqoodkiisa waan idinka jebin doonaa, oo jebbooyinka idinku xidhanna waan jebin doonaa.

¹⁴ Oo Rabbigu wuxuu bixiyey amar kugu saabsan, si aan innaba mar dambe jirin farcan magacaaga sii wada. Guriga ilaahyadaada waxaan ka baabbi'in doonaa sanamka xardhan iyo sanamka la shubay, oo waxaan samayn doonaa qabrigaagii, waayo, waxaad tahay wax la fududaystay. ¹⁵ Bal eega kan warka wanaagsan keenaya oo nabadda faafinaya cagihiisa oo buraha dul socda! Dadka Yahuudahow, iidihinna dhawra, oo nidarradiinna oofiya, waayo, kii sharka ahaa mar dambe idinma soo dhex mari doono, waayo, isagii waa la wada baabbi'iyey.

2*Dhiciddii Nineweh*

¹ Kii wax burburinayay waa u soo baxay horti-inna. Qalcaddiinna dhawra, oo jidka ilaaliya, oo guntiga isku giijiya, oo xooggiinnana si weyn u adkeeyya. ² Waayo, Rabbigu sharaftii reer Yacquub wuu u soo celinayaan sidii sharaftii reer binu Israa'iil oo kale, waayo, kuwii wax dhici jiray ayaa dhacay, oo laamahoodii canabka ahaana way wada baabbi'iyeen. ³ Oo raggiisa xoogga badan gaashaankoodiina waa la caseeyey, oo ragga dagaalyahanka ahuna waxay xidhaan dhar guduudan, oo maalintii isdiyaarintiisana gaadhifardoodiyadu waa bir widhwidha, oo warmihiina waa loo ruxay si cabsi badan. ⁴ Gaadhifardoodyada ayaa jidadka dhexdooda ka gurdamaya, oo jidatka balballaadhan ayaa midkoodba kan kale ku cidhiidhinaya, oo muuqashadooduna waa sida qori iftiimaya oo kale, waxayna u ordayaan sida hillaaaca oo kale. ⁵ Wuxuu xusuustaa geesiyaashiisii, way turunturoodaan markay socdaan, oo derbigay ku degdegayaan, gabbaadkana waa la diyaariyey. ⁶ Irdihii webiyaashu way furmeen, oo gurigii boqorkuna waa baabba'ay. ⁷ Husab waa qaawan tahay, iyadii waa la kaxaystay, oo addoommaheediina waxay ugu musannaabayaan cod u eg midka qoolleyda oo kale, laabtana way garaacayaan. ⁸ Laakiinse Nineweh waxay tan iyo waagii hore ahaan jirtay sidii balli biya ah, habase yeeshiee way cararayaan. Waxaa lagu qayliyaa, War jooga, jooga! laakiinse ninna dib uma eego. ⁹ War lacagta dhaca, oo dahabka dhaca,

waayo, kaydka iyo maalka wacan oo sharafta leh oo dhammu innaba dhammaad ma leh. ¹⁰ Way madhan tahay, oo waa baabba', oo waa cidla, oo qalbigu waa dhalaalayaa, lowyuhuna way is-garaacayaan, oo qof kasta dhexdiisa xanuun baa ku jira, oo kulligoodna wejigooda cabsi baa ka muuqanaysa. ¹¹ Bal meeday bohoshii libaaxyadu, oo meeday meeshii lagu quudin jiray libaaxyada qayrabka ah, taasoo ah meeshii ay ku socon jireen aarka iyo goosha iyo dhasha libaaxu, iyagoo aan ciduna cabsiin? ¹² Aarkii libaaxu wuxuu dhashiisii u dildillaaciyeey wax ku filan, oo goolihiisiina wax buu u dilay, oo godadkiisii wuxuu ka buuxsaday ugaadh, oo boholihiisiina wuxuu ka buuxsaday raq. ¹³ Rabbigii ciidammadu wuxuu leeyahay, Bal eega, anigu col baan idinla ahay, oo gaadhifardoodyadana qiiq baan ku gubi doonaa, oo libaaxyada qayrabyada ahna seef baa baabbi'in doonta, oo waxa aad ugaadhsataanna dhulkaan ka dhammayn doonaa, oo codkii wargeysyadiinnana mar dambe lama maqli doono.

3

Waxaa Iska Hoogay Nineweh

¹ Waxaa iska hoogtay magaalada dhiigga! Waayo, dhammaanteed waxaa ka buuxa been iyo dhac, oo boobkuna iyada kama dhammaado. ² Oo waxaa ka buuxa dhawaaqa karbaashka, iyo dhawaaqa giraangiraha qablamaya, iyo fardo qoobqaadaya, iyo gaadhifardoodyo boodboodaya, ³ iyo fardooley hor u socda, iyo seef dhalaalaysa, iyo waran birbirqaya,

iyo dad badan oo la laayay, iyo bakhti faro
 badan oo iskor tuulsan, oo meydadkuna innaba
 dhammaad ma leh, oo waa lagu turunturoodaan
 meydadkooda,⁴ maxaa yeelay, waa dhillanimadii
 faraha badnayd oo ay fashay dhilladii aad loo
 jeclaa oo ah sayidaddii sixirrada, oo quruumo
 ku iibisa dhillanimadeeda, oo reerona ku
 iibisa sixirradeeda.⁵ Rabbigii ciidammadu
 wuxuu leeyahay, Bal eeg, col baan kula
 ahay, oo gogaradahaagana waan kaa feydi
 doonaa oo wejigaan kuu saari doonaa, oo
 waxaan quruumaha tusi doonaa cawradaada,
 boqortooyoyinkana ceebtaada.⁶ Oo wasakh
 baan korkaaga ku tuuri doonaa, oo ceeb
 baan ku saari doonaa, oo waxaan kaa dhigi
 doonaa wax lagu dhaygago.⁷ Oo waxay noqon
 doontaa in kuwa ku fiiriya oo dhammu ay
 kaa cararaan oo ay yidhaahdaan, Nineweh
 waa la baabbi'iyey, bal yaa iyada u barooran
 doona? Xaggee baanse kuwa u tacsiyeeya uga
 doonaa?⁸ Bal adigu miyaad ka wanaagsan tahay
 Noo Aamoon, taasoo webiyada dhexdooda ku
 jirtay, oo ay biyuhu ku hareeraysnaayeen, oo
 dhufayskeedu u badda ahaa, derbigeeduna
 u badda ahaa?⁹ Itoobiya iyo Masar waxay
 ahaayeen xooggeeda aan dhammaadka lahayn,
 oo reer Fuud iyo reer Luubiimna waxay ahaayeen
 kuwii u hiilin jiray.¹⁰ Habase yeeshie iyadii
 waa la kaxaystay oo maxaabiis ahaan baa loo
 watay, oo dhallaankeediina dhulkaa lagaga
 tuuray jidadka rukummadooda oo dhan, oo
 nimankeedii sharafta lahaa saami baa loo
 ritay, oo raggedii waaweynaa oo dhanna

silsilado baa lagu xidhay. ¹¹ Oo weliba adigu waad sakhraami doontaa oo waad qarsoonaan doontaa, adiguna cadowga aawadiis dufays baad doondooni doontaa. ¹² Qalcadahaaga oo dhammu waxay noqon doonaan sida geedo berde ah oo midho hore u bislaaday ku yaalliin, oo haddii la ruxruxo waxay ku soo daatan kan wax cuna afkiisa. ¹³ Bal eeg, dadkaaga ku dhex jooga waa dumar, oo irdaha dalkaaguna waa u bannaan yihiin cadaawayaaashaada, oo qataaradaadiina dab baa baabbi'iyey. ¹⁴ Biyo u soo dhaanso hareeraynta aawadeed, oo qalcadahaagana adkee. Dhoobada dhex gal, oo dhigada ku joogjoogso, oo xoog u yeel meesha lebenka lagu dubo. ¹⁵ Halkaasaa dab kugu laasan doona, oo seef baa ku baabbi'in doonta, oo waxay kuu dhammayn doontaa sida koronkorro, bal isu badi sidii koronkorro oo kale, oo sidii ayax oo kale isu badi. ¹⁶ Baayacmushtariyaashaadii waxaad ka sii badisay xiddigaha samada, koronkorraduse intay wax cunto bay iska duushaa. ¹⁷ Kuwaaga taajka lahu waa sidii ayax oo kale, oo karraaniyaashaaduna waa sidii kobojaan raxan ah, kaasoo maalintii qabow xaydaanka dhex dega, laakiinse kolkii qorraxdu soo baxdo way iska cararaan, oo meeshay joogaan lama yaqaan. ¹⁸ Boqorkii Ashuurow, adhijirradaadii lulo baa haysa, geesiyaashaadii way nasanayaan, dadkaagii wuxuu ku kala firidhsan yahay buuraha dushooda, oo wax iyaga soo ururiyana lama arko. ¹⁹ Nabarkaagu bogsan maayo, dhaawacaaguna aad buu u xun yahay, oo

kuwa warkaaga maqla oo dhammuba way kugu
sacab tumaan, waayo, bal waa kuma kan aanay
xumaantaadu had iyo goorba gaadhin?

**Kitaabka Quduuska Ah
The Holy Bible in the Somali language of Somalia,
Adan Jim'ale Version**

copyright © 1979, 2008 Society for International Ministries -- Kenya

Language: Somali

Translation by: SIM International

Somali, Kitaablka Quduuska Ah

This translation, published by the SIM, was published in 2008.

. If you are interested in obtaining a printed copy, please contact the SIM at PO Box 72983, Nairobi, Kenya.

. This translation text is made available to you under the terms of the Creative Commons License: Attribution-Noncommercial-No Derivative Works. (<http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/>) In addition, you have permission to port the text to different file formats, as long as you do not change any of the text or punctuation of the Bible.

You may share, copy, distribute, transmit, and extract portions or quotations from this work, provided that you include the above copyright information:

You must give Attribution to the work.

You do not sell this work for a profit.

You do not make any derivative works that change any of the actual words or punctuation of the Scriptures.

Permissions beyond the scope of this license may be available if you contact us with your request.

This translation is made available to you under the terms of the Creative Commons Attribution-Noncommercial-No Derivatives license 4.0.

You may share and redistribute this Bible translation or extracts from it in any format, provided that:

You include the above copyright and source information.

You do not sell this work for a profit.

You do not change any of the words or punctuation of the Scriptures.

Pictures included with Scriptures and other documents on this site are licensed just for use with those Scriptures and documents. For other uses, please contact the respective copyright owners.

2017-08-31

PDF generated using Haiola and XeLaTeX on 11 Nov 2022 from source files
dated 29 Jan 2022

3ab4b284-9860-5955-80fb-586830f21756